TILMAANTA KALA SIKASHADA BULSHADA & FIKIRKA SIYAASADDA
Waxaan ka helnay su'aalo badan shaqaalaha iyo xubnaha bulshada labadaba oo ku saabsan habka ugu haboon ee loo muujiyo aragtida bulshada ama siyaasada ee iskuullada - ha noqoto mid qadka ah ama mid leys-la jooga. Waxaan fahansanahay kuna qanacsanahay in ardaydeena, qoysaskeena iyo shaqaalaheena waxay leeyihiin caqiidooyin udhaxeeya noocyada siyaasadeed.

Halkee Beynu Ka Taaganahay
Annagu degmo ahaan waannu sharfnaa dhammaan aragtiyaha illaa inta aysan dhiirigelineynin nacaybka, cunsuriyadda ama takoor nooc kasta oo ay tahay. Sida ku cad degmadeena Educational Equity Policy, sinaanta waxbarashadu waxay ku saabsantahay ka wada qayb galka iyo cadaalada bulshada ee ku saabsan jinsiyada, qowmiyada, midabka, diinta, dhalashada wadanka, xaalada socdaalka, luuqada, dhaqaalaha qoyska, da'da, dhaqanka, deegaanka juqraafi, dhaqdhaqaaqa, jinsiga, jihada galmada, sinaanta jinsiga, muujinta jinsiga, naafonimada iyo aqoon hore.

Annagu waxaan aaminsanahay in Nolosha Qofka Madow ay Tahay Muhiim.

Annagu waxaan aaminsanahay in "Nolosha Qofka Madow Waa Muhiim " ay aasaas ahaan tahay cadeyn cad oo ku saabsan caddaaladda bulshada ee waafaqsan dadaalkeena ardayda - Madow, Brown, Dadka asalka ah iyo ardayda kale ee midabka leh - kuwaas oo taariikh ahaan nidaamka waxbarasho ee Mareykanka aanu adeeg sare siinnin. Waa aqoonsi ku saabsan farqiga u dhexeeya nidaamkeena (yacni qalin jabinta iyo anshaxa) oo soo jeedinaysa in degmadeena aysan sifiican ugu adeegin ardaydan. Sidoo kale waa wado lagula xisaabtami karo degmadeena hagaajinta khibradaha ardayda si horay loogu socdo.

Annagu ma taageerayno koox abaabulan ama olole siyaasadeed.

Annagu waxaan taageersanahay qoraalkii Gudiga Waxbarshada Gobolka ee Waaxda maamulka Waxbarashada Oregon ee sharciga lagu tilmaamo All Students Belong.Waxay diiradda saaraysaa caafimaadka iyo badbaadada ardayda iyo barayaasha iyadoo la abuurayo jawi iskuul oo loo dhan yahay. Waxay sidoo kale ka mamnuucaysaa astaamaha nacaybka - oo ay ku jiraan naazi-ga(swastika), xariga daldalka iyo calanka Confederate-ka iskuulada.

Annagu waxaan aaminsanahay in iskuulada dadweynaha ay awood u leeyihiin inay kor u qaadaan u dulqaadashada dadka liita iyadoo aan la siinin waqti isku mid ah dulqaad la'aanta waxayna si gaar ah uga mamnuuci kartaan ardayda iyo barayaasha inaaney

adeegsadaan luqad nacayb ah ama soo bandhigaan calaamadaha nacaybka, sida looga hadlay Student Code of Conduct.

Maxey kaga dhigantahay tani fasalka

Annagu waxaa naga go'an inaan noqono degmo dugsi oo ka soo horjeedka cunsuriyada iyadoo la sameynayo jawi dhaqan ahaan fiican, waxna ka qabta loona wada dhan yahay oo loogu talagalay dhammaan ardayda, gaar ahaan kuwa geeska la geliyo.

Annagu waxaan ku mashquuli doonnaa shaqadan heer kasta oo fasal ah ee ka jira degmadeena, anaga oo ku bilaabi doonna ardaydeena waxbarata ee ugu da'da yar. Toddobaadyada soo socda, ardaydeena K-2 waxaa loo soo bandhigi doonaa fikradaha aqoonsiga, kala-duwanaanta, jinsiyadda iyo cunsuriyadda ee manhajka da'da ku habboon ee la jaanqaadaya Oregon K-12 Social Sciences Academic Content Standards, K-5 Social Studies Essential Questions and Oregon Ethnic Studies Standards (draft). Shaqadani waxay ka sii socotaa fasalada cilmiga bulshada ee fasalada kore, maadaama aan kobcinayno wada hadalo muhiim ah isla markaana loo abuuro goobo amaan ah ardayda si ay macno ugu yeelato aduunka ku xeeran. Tusaale ahaan, waxaan ku dhex nool nahay mid ka mid ah dhaqdhaqaaqyada bulsheed ee ugu weyn taariikhda ummaddeenna. Si aan loogu oggolaan ardayda inay ka wada hadlaan waxa ay ku arkeen Mawduuca Nolosha Madow waa Muhiim iyo dhaqdhaqaaqyada bulsheed ee la xiriira - iyo sidoo kale jawaabaha kala duwan ee dhaqdhaqaaqaas - waxay noqon doontaa fursad ka luntay oo lagula falgalo waqtiga, barashada dhabta ah.

Annagu waxaa go'an inaan siino jawi dhamaan fasaladeena - oo ay kujiraan kuwa ka baxsan maadooyinka cilmiga bulshada - si ardaydu wax uga bartaan aragtiyada kala duwan una qaadaan talaabo kor loogu qaadayo sinaanta gudaha iyo banaanka dugsiyadeena.

Annagu Waxaan fahamsanahay in wada hadaladan aysan ahayn munaasabado lagu dhiirrigelinayo ama loogu doodayo qiyamka shaqsiyeed ama waxa la aamminsan yahay ee ku saabsan siyaasadda, diinta ama arrimaha kale ee dhaqanka. Doorkayaga barayaashu waa inaan fududeyno wadahadalka ku saabsan arrimaha ku saabsan jawiga dulqaad iyo loo dhan yahay sida lagu sharaxayin School Board Policy INB.

Maxaa la ogolyahay

Annagu waxaan rabnaa fasaladeena - ha ahaadeen kuwo caadiga ah ama kuwo Khadka ah - inay noqdaan kuwo soo dhaweynaya ardayda oo dhan Waxaan aqoonsan nahay in shaqaalaha iyo ardayduba ay xaq u leeyihiin freedom of expression, illaa inta

hadalkaasi uusan si weyn u carqaladeynaynin jawiga waxbarashada isla markaana uusan ku xadgudbin xuquuqda dadka kale ay u leeyihiin inay helaan waxbarashadooda.

Shaqaaluhu waa inay ka digtoonaadaan saameynta dhaqankooda shaqsiyadeed iyo fikirkooda ay ku yeelan karaan ardaydooda iyo rabitaankooda ardaydooda ee ku lug lahaanshaha wadahadalka, gaar ahaan marka aragtiyada ay ku kala duwan yihiin. Barayaal ahaan, waxaan dooneynaa inaan dhiirrigelinno - ma ahan hadal-isku dirid ah.

Waa kuwan tusaalooyin waxa la oggol yahay:

- Shaqaaluhu waxay ku labisan karaan dharka leh sumadda Black Lives Matter ama badhamada shakhsiyaddooda jir ahaaneed ama sawirada muuqaaladooda khadka. Shaqaaluhu waxay soo bandhigi karaan calaamadaha Black Lives Matter, ha ahaadeen kuwo muuqaal ah ama kuwo khadka ah.
- Shaqaaluhu waxay xiran karaan dhar ama badhamada shakhsiyadooda jir ahaaneed ama muuqaalahooda gaarka ah ee Khadka ah ee taageera xuquuqda LGBTQ Shaqaaluhu waxay soo bandhigi karaan calaamadaha la xiriira dabaaldega calaamadaha ama calammada(Pride-related signs or flags), ha ahaadeen kuwo muuqdo ama kuwo khadka ah.
- Shaqaaluhu waxay xiran karaan dhar ama badhamada shakhsiyadooda jir ahaaneed ama astaamaha khaaska ah ee ay ku taageerayaan musharixiinta siyaasadeed ama xisbiyada ama soo bandhigaya halkudhig olole, sida ku cad Oregon Administrative Rule ORS 260.432.
- Noocyada kale ee muujinta shaqsiyadeed ee fasallada waxaa suuragal ah in loo oggolaado illaa iyo inta aysan ku abuureyn carqalad weyn jawiga waxbarashada.
- Shaqaaluhu waxay wax ku qori karaan koontooyinkooda warbaahinta bulshada ee gaarka ah iyo ka faallooshada koontooyinka kale ee warbaahinta bulshada ee matalaya aragtidooda iyo ra'yigooda. Qoraaladaas oo kale iyo faallooyinka waa in la sameeyaa inta lagu jiro saacadaha aan shaqada ahayn. Si kastaba ha noqotee, xubnaha shaqaaluhu waa inay taxaddar muujiyaan markay qoraalladan oo kale sameynayaan, maadaama ay wiiqi karto awooddooda ay u gutaan shaqooyinkooda haddii waxyaabaha ku jira qoraalladaasi ay si weyn u carqaladeeyaan jawiga shaqada.

Waa kuwan tusaalooyin aan la oggolleyn:

- Calaamadaha ama sawirada naazi-ga(swastika), xariga daldalka iyo calanka Confederate-ka, sida ku cad sharciga Gudiga maamulka Waxbarashada Gobolka, All Students Belong.
- Astaamaha sarraynta caddaanka ama nacaybka
- Shaqaaluhu ma xiran karaan mana soo bandhigi karaan halku dhigyo taageeraya ama dhiirigelinaya ka reebitaanka, sida “Build the Wall.”

- Shaqaaluhu maku soo bandhigi karaan boodhadhka ololaha ama calaamadaha lagu taageerayo musharrixiinta ama xisbiyada gaarka ah fasalladooda ama goobaha shaqada, ha noqdaan mid muuqda ama muuqaal ah.
- Shaqaaluhu kuma soo qori karaan qoraalo koontada baraha bulshada ee iskuulka ama degmada ee matala aragtidooda iyo ra'yigooda siyaasadeed.
- Shaqaaluhu maku beddeli karaan saxeexooda emaylka ee degmadu inay ku soo darto hal-ku-dhigyo, fikrado ama weero falsafad ah.

Haddii aad qabtid su'aal ama walaac ku saabsan siyaasadda degmada, fadlan u dir emayl David Williams, Maamulaha Fulinta ee Hindisaha Istiraatiijiyadeed David_Williams@beaverton.k12.or.us.

Yaan dooneynaa inaan noqono

Annagu waxaan ku dadaalaynaa inaan noqono degmo ka soo horjeedda cunsuriyadda halkaas oo dhammaan ardayda iyo shaqaaluhu ay dareemaan soo dhaweyn, qiimeyn iyo maqal. Iyadoo la siinayo macluumaad dhab ah, dhiirigelinta wadahadal wax ku ool ah iyo abuurista goobo ammaan ah, ardaydeenu waxay awoodi doonaan inay ku tababaraan xirfadahooda fekerka muhiimka ah si ay u gaaraan go'aanadooda u gaarka ah.

Annagu waan kaaga mahadineyneynaa inaad nagala shaqeeysay shaqadan muhiimka ah.